Cadaygu afka wuu nadiifiyaa Ilaahayna wuu raali galiya

Caa'isha- Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inay tiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Cadaygu afka wuu nadiifiyaa Ilaahayna wuu raali galiya".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay An-nisaa'i iyo Axmed]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in laanta geedka cadayga ah iyo wixii la mida uu ka nadiifiyo afka iyo ilkaha wixii wasakha ama ur ah. Wuxuuna ka mid yahay asbaabta u keenaysa Adoonka Ilaahay raali ahaantiisa, waayo waxaa ku jira-cadayga adeecida Ilaahay iyo amarkiisa oo la qaato, iyo nadaafada Ilaahay jecel yahay.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3588